



PGE waxay wada shaqayn la bilawday PPS si ay sare ugu qaadaan abuurista manhaj cimilada ka hadlaya oo dhammaystiran

Abuurista Dugsiyada Dadweynaha Portland ay abuurayaan manhaj kusaabsan isbaddalka cimiladu wuxuu helay taageero wayn toddobaadkii hore. Munaasibad wadajir ah oo ka dhacday dugsiya Bridger K-8 School, Portland General Electric waxay ku dhawaaqday inay ku maalgalinayso \$250,000 dadaalka.

Maalgalinta saddexda sano ah, oo la soo mariyey Sanduuqa Dugsiyada Dadweynaha Portland, wuxuu ka caawin doonaa PPS abuurista manhaj noociisa ah kii ugu horreeyey oo ah K-12 (fasalka barbaarinta iyo fasalka 12aad) kaasi oo lagu baranayo sababaha keena iyo cawaaqiibta ka dhasha isbaddalka cimilada, iyo sidoo kale xalal suurtoagal noqon kara.

“Iyadoo ay jirto walaaca sii kordhaaya ee la xiriira isbaddalka cimilada adduunka, PPS waxay ka qaadanaaysaa qaab halabuurnimo leh iyo go’aan cad si ay u taageerto barayaasha iyo ardayda iyadoo soosaaraysa manhaj iyo waxqabadyo caddaaladda cimilada la xiriira,” Kormeere Guud Guadalupe Guerrero ayaa dhahay. “Ka dhigista manhajka mid si fudud loo heli karo waxay xoojinaysaa dadaaladeena xagga soosaarista manhajka iyo taageeridda fahamka iyo u-doodista sii kordhaysa ee dhallinyarreena ee mawduucan muhiimka ah.”

Iskaashigu wuxuu isugu yimi isagoo jawaab u ah u doodista ardayga. 2016, ardayda iyo u-doodayaasha isbaddalka cimiladu waxay la xiriireen Guddida PPS ee Waxbarashada si ay uga codsadaan aqoon xagga cimilada ah oo dhammaystiran. [Guddidu waxay ansixiyeen qaraar](#) si ay u soosaaraan una hirgaliyaan qorshe, degmada iyo bulshaduna waxay ka wada shaqeeyeen abuurista manhaj. Degmadu waxay shaqaalaysiisay [shaqaalaysiisay Nichole Berg](#) inuu noqdo Maamulaha Barnaamijka ee Isbaddalka Cimilada iyo Caddaaladda Cimilada, iyadoo la rumaysan yahay inay tahay shaqadii ugu horraysay ee noocan ah waddanka oo dhan.

Deeqda ka imanaysa PGE waa maalgalintii ugu horraysay oo wayn ee loogu talagalay [Sanduuqa PPS](#), kaasi oo loo abuuray in ganacsiyada iyo bulshada muxsiniinta ah ee ku lugta leh degmadu ay ka shaqeeyaan oofinta [hiigsiiga xagga ardayda iyo barayaasha](#).

“Waa tusaale maalgalin toos ah oo qiime leh oo ku aaddan barnaamij kaasi oo ardaydu udub-dhexaad u yihiin una muhiim ah bulshadeena,” ayey dhahday Victoria Lara, oo ah guddoomiyaha guddida Sanduuqa PPS.

Manhajka, agabka tabobarka iyo ku-camalfallada ugu wanaagsan waxay noqon doonaan il furan, taasi oo ka dhigan inay si furan u heli karaan degmooyinka iyo dugsiyada kale.

Marka lagu daro maalgalinta, shaqaalaha PGE waxay noqon doonaan khabaro waxa lagu darayo (manhajka), taasi oo caawinaysa abuurista agab fasal oo dheeraad ah iyo barasho mashruuc kusalaysan taasi oo bari doonta ardayda muhiimadda tamarta nadiifta ah ee lagula dagaalamayo isbaddalka cimilada. Waxay ku biiri doonaan shaqaalaha, ardayda, barayaasha, xubnaha bulshada ee horseedka, ururrada dawladda iyo bulshada, iyo hoggaamiyayaasha hormo-ganacsiyeedka (industry) marka la eegayo xogogaalnimada soosaarista manhajka.

“Waa daruuri ah inaynu wada shaqayno, innagoo qaabaynayna iskaashiyada dadweynaha iyo kuwa gaarka ah si aynu ula dagaalanno isbaddalka cimilada una buuxinno yoolalka tamar nadiif ah ee Oregon,” ayey dhahday Maria Pope, Madaxweynaha iyo Agaasimaha PGE. Iskaashiga aannu la yeelanay Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay awood noo siinaysaa inaannu toos ula shaqayno ardayda iyo macallimiinta kuwaasi oo ka shaqayn doona dhibaatooyinka cimilada adduunka ee dhabta iyo xalal halabuurnimo leh.”

Hirgalinta manhajka sbaddalka cimilada ee K-12 wuxuu ka bilaabmi doonaa dayrta 2021 maaddooyinka cilmiga bulshada iyo sayniska. Macluumaad dheeraad waxaad ka heli kartaa halkan [web-beyjka caddaaladda cimilada](#).